Talaaka Pertussis, Diphtheria, Tetanus, Polio and Infant Haemophilus nooca B (cPDT Polio + Hib)

Talaalku (ama iraabka ama durniinka ilmuhu) waxa weeye sida ugu wanaagsan ee loogaga hor tegi karo cudurada khatarta ah. Ururada Canadian Paediatric Society iyo National Advisory Committee on Immunization waxa ay si adag isugu raaceen talaal joogto ah.

cPDT Polio + Hib waxa weeye talaal shan nooc isugu jira. “cP” waxay u taagan tahay “component pertussis” oo sidoo kale loo yaqaano “acellular pertussis” ama “aP.” Sidaa darteed, mararka qaarkood talaalkan isku jira waxa loogu yeedhaa “DTaP Polio + Hib.” Wuxuu kala dagaalamaa caruurta kixda, gawracatada, teetanada, qalalka iyo cudurada khatarta ah sida qoor-gooyaha uu keeno jeermiska Hib (Haemophilus influenzae nooca b). Talaalada cPDT Polio iyo Hib waxay jiraan iyaga oo keli-keli ah. Talaalka diphtheria, tetanus iyo polio waxa sharciyan looga baahan-yahay dhamaan caruurta wax ka barata dugsiyada Ontario (haddii aan laga dhaafin).

Waa maxay kixdu (pertussis)? Kixdu (Pertussis ama whooping cough) waxa weeye cudur halis u ah khaasatan caruurta. Caruurta qaada cudurkani waxa ay yeeshaan qufac is daba joog ah oo xoog badan. Qufacani wuu ka matajin karaa caruurta ama neefta ayaa qaban karta mudo yar. Qufucu wuxuu hayn karaa caruurta mudo todobaado ah waxaanu caruurta ku adkeeyaa siddii ay wax u cuni/cabi lahaayeen iyo xitaa neefta. Kixdu waxay keentaa dhibaatooyin badan oo khatar ah. 10kiiba laba ka mid ah caruurta kixda qabta waxaa ku dhici kara oof-wareen. Kixdu waxa kale oo ay dhaawici kartaa maskaxda, suuxdimona way keeni kartaa waana loo dhiman karaa. Dhibaatooyinkani badi waxay ku dhacaan caruurta dhalata. Kixda si fudud ayaa loo kala qaadaa waxaana laga qaadaa hindhisada ama qufaca.

Waa maxay gowra-catadu(Dhiphtheria)?
Gawracatadu waa cudur halis ah oo ku dhaca sanka, cunaha iyo maqaarka. Waxay keentaa cuno xanuun, xumad iyo jidhi-dhico. Way ku xumaan kartaa qofka waxaana ay keeni kartaa neef qabatin, wadne joogsi iyo dareemada jidhka oo dhaawacma. Gawracatada waxaa ku dhinta mid ka mid ah tobankii qof ee qaadaba. Badi waxa laga kala qaadaa qufaca iyo hindhisada.

Waa maxay teetanadu? Teetano ama daaman isku dhegu waxa weeye cudur halis ah kaas oo iman kara marka wasakh ay la socoto baakteeriyada tetanadu gasho meel maqaarka dilaacsan. Baakteeriyada teetanada waxa lagu arkaa meel kasta gaar ahaan ciida, siigada iyo saalada xoolaha. Dadku iskama qaadaan. Teetanadu waxay xanuujisaa muruqyada qoorta, gamcaha, lugaha iyo caloosha iyo garaac, sidoo kale waxay leedahay xanuun badan oo lafaha jebin kara. Xitaa haddii hore loo ogaado, teetanadu waxay dishaa laba ka mid ah 10kii qof ee qaada.

Waa maxay polio-du? Polio-du waxa weeye cudur khatar ah oo laga qaadi karo biyaha la cabo ama cunto ay la socoto baakteeriyada polio-du. Waxa kale oo laga qaadaa dadka qaba. Cudurku wuxuu dhaawici karaa dareemayaasha qofkuna curyaan ayuu noqon karaa noloshiisa. Wuxuu curyaaminkaraa muruqyada loo adeegsado neefsashada, hadalka, cunada iyo socodkaba. Sidoo kale waa lagu dhiman karaa.

Waa maxay cudurka Haemophilus influenzae nooca B (Hib) ?
In kasta oo "influenzae" uu yahay qayb ka mid ah magaca cudurkan, jeermiska Hib ma keeno influenza ama safka. Xanuunka Hib ayaa in badan ka khatarsan. Ka hor intii aan la isticmaali jirin talaalka Hib, jeermiska Hib wuxuu ahaan jiray midka sida caadiga ah caruurta xanuunka u keena. Hib wuxuu ahaan jirey waxa caruurta da'doodu u dhaxayso laba bilood ilaa shan sanno u keena xanuunka qoor-gooyaha. Qoor-gooyuhu waa cudur ku dhaca biyaha ku jira iyo maqaarka daboola laf-dhabarta. Qoor-gooyuhu wuxuu keeni karaa dhaawac maskaxeed, dhibaatooyin ayuu u keeni karaa wax barashada iyo koritaanka, dhego la'aan iyo indho beel ayaa laga qaadi karaa. Mid ka

mid ah 20-kii caruur ah ee uu ku dhaco Qoor-gooyuhu ayaa dhiman kara dhibaatooyin la'xaad beel ihina(dhaawaca dareemayaasha iyo dhego-beel) waxay ku dhici karaan boqolkiiba 15.

Jeermiska Hib wuxuu sidoo kale xanuun khatar ah u keeni karaa dhuunta meel u dhow sanduuqa hadalka. Xanuunkan waxa la yidhaahdaa epiglottitis. Tani waxay ilmaha ku dhibtaa neefsashada.

Jeermiska Hib wuxuu kale oo uu cudur ku ridaa sambabada (pneumonia) lafaha iyo xubnaha. Caruurta da'doodu ka yar tahay shan sanno ayaa halis aad ugu ah oo qaadi kara cudurka Hib. Caruurta aada xarumaha xanaanada ayaa u badan inay cudurkan qaadaan. Jeermiska Hib waxa laga qaadaa ama uu ku fidaa qufaca ama hindhisada.

Ilaa xad intee le-eg ayuu talaalka cPDT Polio + Hib difaaci karaa ilmahayga?

Marka inta irbadood ee talaalka cPDT Polio + Hib loogu tala galay la siiyo, waxay ka difaacdaa boqolkiiba 85 xanuunka kixda, in ka badan boqolkiiba 95 gaw-racatada, 100kiiba boqol teetanada, boqolkiiba 99 waxay ka difaacdaa polio-da. Talaalku waxa kale oo uu u sahlaa caruurta xanuunadani haddii ay ku dhacaan.

Da'dee ayaa ilmahayga lagu siin karaa talaalka cPDT + Hib Polio ?

Talaalka hore ilmahaaga waa in la siiyo marka uu laba bilood jiro. Saddex irbadood oo kale ayaa loo baahan yahay- in la siiyo marka uu ilmuhu gaadho afar, lix iyo 18 bilood.

cPDT Polio(oon la hayn talaalka Hib) waxa ilmaha la siiyaa ka hor inta aanuu bilaabin xanaanada ama dugsiga. Talaal suubis ah oo ka hortaga teetanada, kixda iyo polio-da ayaa kadib la siiyaa marka uu ilmuhu 15 sanno gaadho. Talaalkan ka dib, talaalo suubis ah oo ka hortaga teetanada iyo kixda ayaa la isiiga baahan yahay10kii sanadoodba si loo helo ka hortag joogto ah.

Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu aanu qaadan talaalada mid ka mid ah?

Ilmahaagu waa inuu qaataa talaalka ku xiga kii aanu qaadan sida ugu dhakhsaha badan. Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegi goorta aad u soo noqonayso talaalada kale. Haddii aanu ilmahaagu qaadan talaalkii ugu horeeyey markuu laba bilood ahaa, dhakhtarkaaga ayaa kuu qorshayn jadwal "la-qabsi ah" oo gaar u ah ilmahaaga.

Caruurta da'doodu u dhaxayso 15 bilood ilaa shan sannadood ee aan hore loo talaalini waxay u baahanayaan hal talaal oo isugu jira cPDT Polio + Hib, ka dibna talaalo cPDT polio oo dheeraad ah.
Caruurta da'doodu tahay shan sanno iyo kuwa ka weyni uma baahna talaalka Hib, markaa talaalka cPDT Polio oo keli ah ayaa da'dan u noqonaya talaalka la siinayo. Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegi talaalada kale ee ilmahaagu u baahan yahay.

Ma yahay talaalka cPDT Polio + Hib mid aan wax yeelo lahayn?

Haa. Dhibaatooyinka khatarka ee uu keenaa aad ayey u yar yihiin. Damqasho yar, barar, meesha oo casaataa dhawr maal-mood waxay caadi u tahay talaalkan. Caruurta qaar ayaa xumad yeesha, xasaasadooda, cuntada diida ama ooya amaba lulooda maalin ama laba maalmood ka dib marka ay talaalka qaataan. Dhakhtarkaagu laga yaabaa inuu kugu la taliyo inaad ilmaha siiso dawo la yidhaahdo acetaminophen si looga hor tago xumada iyo xanuunka. Dhibaatooyin aan badi la arag, oo ku dhaca mid ka mid ah malyan(million) kii caruur ah ee qaata talaalka kixda ee la siin jiray ka hor bisha Luulyo 1997, (oo la odhan jiray "whole cell" pertussis vaccine) wuxuu ahaa Encephalopathy. Encephalopathy, (xanuun maskaxeed ama maqaarka maskaxda), xanuunka ay keeni karto waxa ka mid ah madax xanuun, qoor dhisan, dabeecada oo is bedesha, wareer ama cadho dhawaansho, ama hadalka oo aan la karin. Dadka yeeshay astaamahani mudo yar ayey dhamaan ku bogsadeen. Talaalkan cusubi (component pertussis vaccine-cP)

wuxuu keenaa dhibaatooyin ka yar dhibaatooyinka fudud ee lagu arki jiray talaalkii hore, fursada uu maskax xanuun ku iman karo marka la qaato talaalkanina waa naadir. Talaalkani faa'iidoonyinka uu leeyahay ayaa ka badan khatartiisa. Dumarka uurka leh iyo dhamaan dadka kaleba halis uma aha inay ka qaadaan cudur ilmo dhowaan la talaalay. **Waa inaad had iyo goor dhakhtarkaaga ka waraysato dhibaatooyinka iyo faa'iidooyinka talaalkasta.**

Goorma ayaan dhakhtarkayga la hadlaa?

La hadal dhakhtarkaaga haddii ilmahaagu saddex maalmood gudahood talaalka kadib:

- yeesho xumad badan (ka badan 40 C ama 104 F)
- Ooyo saddex saacadood in ka badan
- suuxo
- ilmaha oo midab doorsooma oo u ekaada siddii wax daan-daansan
- caarooda
- afka ama wejiga uu bararo
- neeftu ay qabato
- ama dhibaatooyin kale oo khatar ah aad ku aragto.

Yaa laga daayaa talaalka cPDT Polio + Hib?

Dhakhatarka ayaa laga yaabaa inuu talaalka ka dhaafo ama u bedelo ilmahaaga haddii uu leeyahay:

- xumad badan ama qabo xanuun ka xun hargab
- uu xasaasiyad ka qaado antibiotic loo yaqaano neomycin ama polymyxin B
- xasaasiyad xun ka qaado talaalka cPDT Polio + Hib (anaphylaxis)
- xasaasiyad ka qaado qayb ka mid ah dawooyinka talaalka ku jira.

Yaan la xidhiidhaa haddii aan su'aalo kale ka qabo talaalka cPDT Polio + Hib?

Wixii faah-faahin dheeraad ah la xidhiidh dhakhtarkaaga ama xarunta caafimaad ee kuugu dhow.

Diiwaan gelinta talaalada Kadib marka ilmahaaga la talaalo, hubi in dhakhtarku kaadhka jaalaha ah ku diiwaan geliyo talaalka. Waxaad u baahan doontaa diiwaan gelintan inaad siiso rugtaada caafimaadka marka ilmuhu dugsiga bilaabayo. Meel adag dhig!